



### **Sanduuqa Dhaqaalaha Cadaaladda Deegaanka ee 2020**

Waa Barnaamij Magaalada Seattle leedahay. Waxaa maamulaya The Bullitt Foundation.

**Sanduuqa Dhaqaalaha Caddaaladda Deegaanka** ayaa hadda aqbalaya [codsiyada waqtiga kama dambaysta ah la dalbanayana waana Jimcaha, Sebtember 25!](#) Waxaa jira \$ 500,000 maaliyad ayaa laga heli karo Magaalada Seattle iyo illaa \$ 60,000 ayuu codsade kasta soo weydiisan karaa. Maalgalintani waxay taageereysaa dadaallada ay hogaaminayaan dadka sida aadka ah ay u saameeyeen arrimaha deegaanka iyo cimilada si ay uga faaiideystaan : Dadka madoow, Asalka ah, Dadka Midabka leh, Muhaajiriinta, qaxootiga, dadka dakhligoodu hooseeyo, dhalinyarada iyo odayaasha ku nool, wax ka barta, ka shaqeeya, ku ciyaara, iyo kuwa ku cibaadeysta magaalada Seattle.

Xafiiska Waaritaanka & Deegaanka, The Office of Sustainability & Environment (OSE) wuu ogyahay in COVID-19 saameyn ku yeeshay jaaliyadeena qaabab aan hada bilaabeynno in aan fahamno. Sababtaas awgeed ayaan u dooneynaa in aan maalgelinno mashaariicda wax ka qabaneysa saamaynta COVID-19 ee xiriirka la leh bulshada iyo caafimaadka deegaanka. OSE waxay martigelin doontaa laba kulan ee maqal iyo ,muqaal macluumaad casri ah leh, [Sebtember 10keeda iyo Sebtember 14keeda](#) si ay ula wadaagaan dulucda Sanduuqa Dhaqaalaha Caddaaladda Deegaanka, sida tayada codsiga adag, hannaanka dib u eegista iyo ka jawaabista wixii su'aalo ah ee aad qabtid. Fiiri [websaydhka](#) si aad isu diiwaangeliso oo aad wax badan uga ogaato. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, email u dir [equityenviro@seattle.gov](mailto:equityenviro@seattle.gov) ama wac (206) 615-0817.